# Guryaha Iskashiga
# Hab kale oo dadka u surtogalinaysa ijar ay awoodi karaan
# Meel wanaagsan oy hoy ku magacaabi karaan

Guryaha iskashigu waxey ku kala yaalin xafad kasta ee magaalada ka tirsan. Gury iskaashi waxuu noqon kara mid ku yaala daaro isku kor dhisan ama aqal xafadeedka isku dhinac yaal oo meel dhexaad ah. Dadka degan guryaha iskaashiga waxey ka yimadeen bulshada qaybaheeda kala duwan oo dhan, kuwaaso dhaqaalahoodu kala sareeyo, mararka qaarkoodna qaarkood u baahan yihiin xanaano gaar ah. Kala gadisnaansha bulshadaas weeye waxa xoogeynaya guryaha iskaashiga.

Waxaa Toronto iyo gobolka York ku yaala 17,000 guryo iskaashi waxaana logu kireeya sicirka suuqa ama mid la kabo. Guryaha iskaashiga oo ijarkooda la kabo waxaa dadka looga ijaaro sicir ka hooseya midka suuqa, taaso inta ka dhiman sicirka suuqa u bixinayo barnamijka kabidda sicirka ijaarka, oo la shaqeeyan guryaha iskaashiga.

Wakhtigaan xaadirka ah, si lugu helo guryaha ijaarkooda la kabo aad bay u adag tahay liiska sugitaanka oo aad u dheer awgeed.

## Hab kale oo dadka u surtogalinaya ijar ay awoodi karaan

Guryaha iskaashigu waxay dadka aan lahayn dakhli ku filan ooy gury ku kireestan habka sicirka caadiga ah ee suuqa u suurtogalinayaan inay helan guryo ay ijaarkooda awoodi karaan, iyagoo mar walba dadkaas u fura liiskooda sugitaanka.
Waxaa Toronto iyo gobolka York ku yaala guriyo liiskooda sugitaanku u furanyahay. Sida qaalibka ahna ijaarka guryaha iskaashigi waa ka jaban yahay midka suuqa.

## Waa maxey guri iskaashi?

Guri iskaashi  waa mid uu u taliyo qofka xubinta ka ah iskaashiga. Xubnaha degan guri iskaashi waxay ka tirsan yihiin iskaashigaas, iyaga ayaana maamula ah iskaashigooda. Xubin kasta cod bay leedahay, sanad walbana xubnuhu waxey iska dhex doortan guddi agaasimiyaal.

## Waa maxey farqiga u dhexeeya guryaha iskaashiga iyo kuwa sida caadi ah  loogu ijaarto sicirka suuqa?

**Dadka ku nool guryaha iskaashiga ma ahaaa ijaartayaal ee waxay yihiin xubin ka mid ah iskashiga**.
Wadajir beyna mas'uul uga yihiin iskaashiga. Xubin kasta waxey leedahay hal cod, sana walbana waxey dhexdooda iska soo doortan guddiga agaasimayasha

**Guryaha iskashiga mulkile leh ma uu jiro**.
Xubnaha iskaashiga ayaa qaata go'aanada muhiimka ah ee lagu xanaaneynayo guryaha iyo habka loo maamulayo intaba.

**Xubnaha ayaa maamula iskashiga**
Xubnahu si ay u maareeyaan maamulka iskaashiga waxey doortan guddi agaasimeyaal. Iskaashiyada intooda badan waxey qortan shaqale u fuliya shaqo maalmeedka
Xubnuhu waxey si wadajir ah uga shaqeeyan sidii guryaha si fiican loogu maamuli lahaa ijaarkoodona u noqdo mid la karikaro.

**Ma ka walwaleysid kordhin ijaar oo xad dhaaf ah**
Mulkilaha gurigu waxuu  ijaarka u kordhiyaa  si ay faa'iidadiisu u badato. Guryaha iskaashigu waa hey'ad aan faa'iido doon ahayn.Taasi micnaheedu ma ahaa in uusan ijaarku

( kharajka deganaanshaha guriga) kor u kacayn. Kharakja deganaanshaha gurigu kor buu u kacayaa mar kastoo kharajka maamulidda guryuhu u kor u kaco, hase ahaatee farqiga u dhexeeya labadaan hab waxuu yahay xubnaaha iskaashiga ayaa ka baraandega ah maaliyadda iskaashiga iyo misaaniyadda ay ku soo taliyaan guddiga agaasimayashu. Marka la isugu yimaado shirka guud oo sanadkiiba mar la qabto, xubnuhu waxey codkooda ka dhiibtaan misaaniyaddaas. Hadii kharajka deganaansha guryahu u kor u kaco, waa kraj la hubo ee ma aha lacag dadka guryaha degan la dul saaranayo si loo helo faa'iido dheeri ah.

**Guryaha sikaashiga waa la isku halayn kara**.
Xubnaha iskaashiga waxaa guryaha looga saari kara oo keliya markay jabiyaan shrciga u degsan iskaashiga.
Iskaashigu waxuu dadka u suurto geliyaa in ay helaan guriyo lagu kalsoon yahay oo la isku hubi karo. Adiga iyo qoyskaagu waxaad ku nolaan kartiin guriga iskaashiga muddo dheer, waxaadana dhisi kartiin xiriir qota dheer ood la yelataan mujtamaca aad halkaas ku wada nooshihiin

**Xubnaha iskaashigu waxey saldhig adag u yihiin bulshadooda**
Si xubnahu ugu nagadaan mujtamooda muddo dheer, Guryaha iskaashiga marnma lama iibinayo ama looma bedelayo hab faa'iido ka dhalis ah.Taaso xubnaha ku dhirigalinaysa ka mid ahaanshaha iyo dacad u ahaanta mujtamacooda, waxey kale oo u sutogalinaysaa inay ku kalsonaadan iskaashiyada iyo nawaxiga oy ku nool yihiin.
Wey u sahlantahy dadka inay mujtamacooda dhexgalaan marka ay og yihiin inay ka mid ahaanayaan muddo dheer.

**Xubnaha iskaashigu waxey qeyb ka yihiin mujtamca weynaha iskaashiyada oo idil**.

Dagaan weynaha Toronto iyo agagaarkeeda waxaa ka jira in ka badan 165 iskashiyo oo ku mideysan is baheysi salbalaarn, kasooy iskaashiydadu ay ka helikaran kaalmo, wargelin iyo talo.

## Sidebaan ku helikara guryaha iskaashiga?

## Habka codsashada guryaha iskashiga

1. iskaashi walba waa hey'ad ka madax banana kuwa kale, sidaas daradeed hababka codsiyadu wey yare kala geddisnaan karan . Badida iskaashiyadu waxey kugu yerayaan in aad ka soo qeybgashid shir xogwaran ka hor ama ka dib markaad soo cadsatid inaad ku birtid iskaashiyada. Mararka qaarkoodna guryaha iskaashigu waxey weydistaan inaad bixisid lacag ku lifaaqan codsiga xubinimada
2. Haddi aad u bahantahay  ijaar kabid waxaa kale oo kula gudboon inaad codasatid in lagugu daro liiska sugitaanka ee ka dhexeeya guryo busheedka Toronto oo dhan.
   Kabidda ijaarada ee guryaha iskaashiga ooy maamusho dowladda hoose, waxaa la siiya qofka ugu horeeya liiska sigitaanka ee dowladda hoose.
   Kabidda ijaarada guryaha iskaashiga oo laga maamulo xaga dowladda dhexe waxaa la siiya qofka ugu horeeya liiska sugitaanka ee guri iskaashi kasta. Hase ahaate, guryaha iskaashiga oo ijaarkooda la kabo aad bay u kooban yihiin.
3. Markii aad soo buuxisid foomka codsiga xubinimada, iskaashigu waxuu soo baraya xaqiiqanimada waraka aad ku soo qortay codsigaaga iyago la xiriiraya mulkilaha guriga aad codsigaga ku sheegtay in aad degan tahay.
   Marki guri u banaado, ama loo baahdo in liiski sugitaanka logu daro codsadeyaal cusub, dadka qaangaarka ah ee ku wada qoran codsiga ayaa logu yeera shir war isweydarsi ah inta aan loo ogolaan xubinimada iskaashiga.